

Date: 29 November, 2017

War-Murtiyeed

Xubno ka tirsan Dallada Bulshada rayid ka ah ee PUNSAA waxa ay ku qaabishay Xafiiskeeda Garowe Guddiga Ganacsatada Puntland Maalinimadii Axada November 26th, 2017 oo Garowe u yimid in ay daneeyayaasha Puntland la wadaagaan Caqabado soo foodsaray Ganacsiga iyo dhaqaalaha Puntland. Guddiga Ganacsatadu waxa ay Madaxda PUNSAA uga warbixiyeen xaalada Guud ee Dekadda Bossaso oo lagu wareejiyey Shirkad laga leeyahay Wadanka Emarataka Carabta oo la yiraahdo P&O Port oo qayb ka ah Shirkada DP World Tariikhdu markay ahayd 28 Oct 2017.

Guddigu waxa ay ka cawdeen

- In aan lala wadaagin heshiiska Dowlada Puntland ay la gashay Shirkada DP world si ay ugu diyaar garoobaan Saamaynta uu heshiiskaas la yimaado.
- In aan lagala tashan qaabka iyo goorta la wareejinayo Dekadda, oo loo sheegay oo kaliya in shirkadu ay dakada la wareegi doonto labo sano kadib marka ay dhamayso balaarinta dakadda, isla markaasna aan la siyaadinayn khidmadaha la qaado ilaa la balaariyo, korna loo qaado adeegyada ay dakaddu bixiso.

Guddiga Ganacsatadu waxa ay ka warbixiyeen wax yaalaha isbadalay intii Shirkada P&O Port ay la wareegtay Maamulka iyo Amniga Dakada Bossaso:

- In sixad dhaaf ah kor loogu qaaday khidmadaha laga qaado maraakiibta alaabaha keena iyo kuwa ka qaada dakada Magalada Bossaso
- In kor loo qaaday si lama filaan ah khidmadaha 33 walxood (items) oo nolosha dadka reer Puntland asaasi u ah, ayna ka mid yihiin Raashinka, Qudaarta, Timirta, Baastada iyo kuwo kale. Khidmadahaas waxa ay keeni karaan sicir babar baahsan oo cid kasta taabta.

Sidaa Darteed, Dallada Bulshada rayidka ah iyo Guddiga Ganacsatadu waxa ay isku afgarteen



1. In la dhiso guddi isku dhaf ah oo ka kala socda Bulshada qaybaheeda kala Duwan iyo Xubno Guddiga Ganacsatada Matala oo ay PUNSAA hogaamiso.
2. Guddigaas waxa ay Dowlada Ka codsanayaan Heshiiskii Nuqulkiisa rasmiga ah si ay u daraasadeeyaaan saamaynta uu ku yeelan karo ganacsiga wax dhoofinta iyo waxsoo dajinta
3. Guddigaas waxa ay ururinayaan cadaymaha khidmadaha la kordhiyey, qiimayna ku samaynayaa in ay yihiin kuwa ay qaadi karaan ganacsatada iyo Bulshada Puntland.
4. Guddigaas waxa ay la Fariisanayaan Madaxda Dawladda Puntland oo uu ugu horeeyo Madaxwaynaha, Wasiirada ay qusayso, Golaha Wakiilada iyo Odayaal Dhaqameedka oo ah Marjaca Dowladnimaha Puntland.
5. Guddigu waxa uu warbixintiisa la wadaagi doonaa odayaasha Dhaqanka iyo Bulshada Puntland si looga fogaado khalkhal dhaqaale, bulsho iyo amni.

Si guud, Dallada PUNSAA waxaay Soo jeedinayaan

- 1) In laga fogaado wax kasta oo ragaadinaya dhaqaalaha, keeni karana Sicir barar saameeya Bulshada Puntland.
- 2) In Dowladdu ay u diyaar garawdo Wada hadal dhexmara Bulshada rayid ka ah oo Ganacsatadu ka mid tahay iyo Dowlada Puntland si la isugu soo dhawaado, loogana wada hadlo caqabadaha soo kordhay.

Gunaanadkii, Madaxda PUNSAA iyo Guddiga Ganacsatadu waxa ay u Mahadceliyeen Ciidamada Amaanka oo naftooda u huray in ay ilaaliyaan nabada iyo xasiloonida shacabka Puntland xiligaan adag oo Puntland ay marayso. Sidoo kale waxay ay ugu baaqeen Cidkasta in ay xil iska saarto sugida amaanka lagana fogaado falkasta oo keeni kara amni darro .

Guddoomiyaha Dalladda PUNSAA

Faysal Axmed Warsame

